Minnesota Tax Court
245 Minnesota Judicial Center
25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd.
St. Paul, MN 55155
http://mn.gov/tax-court
Phone: (651) 539-3260
E-mail: info@taxcourt.state.mn.us

Appeals from Orders of the Commissioner of Revenue Information Racfaanada ka imaada Amarrada Wakiilka Macluumaadka Dakhliga

Macluumaadka soo socda waxaa loogu talogalay in lagu caawiyo cashuur bixiyaasha inay fahmaan xuquuqdooda iyo waajibaadka ka saaran codsiyada cashuurta hantida loo sameeyay Maxkamadda Canshuuraha ee Minnesota. Waxaa loogu talogalay inay siiso macluumaad guud, ma ahan talo sharci.

Waa maxay Amarka Wakiilka Dakhliga?

Wakiilka waxaa looga baahan yahay inuu kuu soo diro ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan isbeddelada canshuurahaaga, in kastoo ogeysiiska aysan qasab ahayn in loogu yeero amar. Guud ahaan, haddii dukumiintiga looga baahan yahay inaad bixiso canshuur dheeraad ah ama diidmo dibu-bixin lacag, waxaa loo tixgeliyaa Amarka Wakiilka Dakhliga oo rafcaan looga qaadan karo Maxkamadda Cashuurta.

Sideen racfaan uga qaadan karaa Amarka Wakiilka Dakhliga?

Waxaad xareysan kartaa **Foomka 1aad ee Maxkamadda Canshuuraha ee Minnesota: Ogeysiiska Racfaanka ee Amarka Gudoomiyaha Dakhliga.** Foomkan waxaa laga heli karaa Maxkamadda Canshuuraha iyo Xafiiska Maamulaha Maxkamadda ee Degmada Maxkamadda(qaybta madaniga) ee degmada aad ku nooshahay. Foomka 1aad waxaa loo adeegsadaa Sheegashooyinka Yaryar iyo Qaybaha Joogtada ah. Tilmaamaha buuxinta fayl ayaa lagu bixiyay foomka.

Waa maxay waqtiga kama dambaysta ah ee rafcaanka?

Racfaan waa inay Maxkamada Canshuurtu ku heshaa mudo 60 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda Amarka Wakiilka Dakhliga. Haddii racfaanka lagu xereeyo boostada, waa in lagu calaamadeeyaa 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda Amarka Guddoomiyaha Dakhliga. *Fiiri* Sharciga. Minn § 1 271.06 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Ma heli karaa waqti kordhin?

Shaqaalaha maxkamada canshuurta ee Minnesota (info@taxcourt.state.mn.us) waxay ku siin karaan 30-maalmood oo dheeraad ah xareynta kama dambaysta ah haddii codsiga kordhinta lagu sameeyo 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda Amarka Wakiilka. Kordhinta waxaa lagu xaqiijin doonaa qoraal. Xeerka Nidaamka Maxkamadda Canshuurta ee Minnesota 8610.0030 waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kordhinta.

Miyaan ku xarayn karaa racfaankeyga Qaybta Dacwadaha Yaryar?

Haddii qadarka la isku haysto uu yahay $15,000 ama ka yar (oo ay ku jiraan ganaaxyo iyo dulsaar), waxaad ku xarayn kartaa midkood Qaybta Dacwadaha Yaryar ama Qaybta Caadiga ah. Haddii qaddarka la isku haysto uu ka badan yahay $15,000, waa inaad ku xaraysaa Qaybta joogtada ah.

Waa immisa khidmadda xaraynta?

Qaybta Joogtada ahi waa $285 Qaybta Dacwadaha Yaryarna waa $150.00. Haddii aad ka xaraysato maxkamadda degmada, waa inaad bixisaa khidmadda maktabadda sharciga degmada marka lagu daro khidmadda xaraynta. Si loo go'aamiyo khidmadda maktabadda sharciga ee degmadaada, la xiriir Maamulka Maxkamadda Degmada ee degmada aad ku nooshahay.

Maxaa dhacaya kadib markaan xareeyo Racfaanka?

Wakiilka Xubinta Dakhliga waa inuu ka xaraystaa jawaabta racfaankaaga (oo loo yaqaan Soo-celin iyo Jawaab) Maxkamadda Canshuuraha 30 maalmood gudahood. Wakiilka Xubinta dakhligu wuxuu codsan karaa 30 maalmood oo muddo kordhin ah. Wakiilka Xubinta ayaa ku siin doona koobiga jawaabta.

Ayaa mattali doona Wakiilka Dakhliga ee kiiskeyga?

Canshuur bixiyayaasha racfaan ka qaata Amarrada Wakiilka Waaxda Dakhliga waxaa lagu magacaabaa racfaan-qaatayaal. Wakiilka Waaxda Dakhliga waa dhinaca ka soo horjeeda waxaana loo yaqaan racfaan laga qaate. Wakiilka waaxda waxaa wakiil ka ah qareen ka socda Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee arrimaha Qaybta Joogtada ah ama sarkaalka racfaanada oo ka socda Xafiiska Wakiilka Dakhliga ee Qaybta Dacwadaha Yaryar.

Goorma ayaa dacwaddayda la dhagaysanayaa?

Kadib marka wakiilka Xubinta uu xareeyo Soocelinta iyo Jawaabta, waxaa lagaa codsan karaa inaad keento Maxkamadda Canshuurta macluumaad dheeraad ah si ay u caawiso qorshaynta kiiskaaga, iyo inaad hesho amar qorshaysan. Waxaa kale oo aad heli doontaa ogeysiiska waqtiga, taariikhda, iyo goobta la horkeenayo maxkamadaynta. Ogeysiiska waxaa loo diri doonaa cinwaanka lagu muujiyay racfaanka. Haddii aad

guurto kadib markii aad xareysay racfaankaaga, **waa inaad ku** wargalisaa maxkamadda canshuurta cinwaankaaga cusub.

Miyaan ka gorgortami karaa xallinta kadib marka taariikhda maxkamadaynta la cayimay?

Inta kiiskaaga la sugayo, waxaad isku dayi kartaa inaad heshiis la gasho Wakiilka Xubinta Waaxda Dakhliga. Haddii aad xalliso kiiskaaga ama haddii aad go'aansato inaad diido kiiskaaga, fadlan ogeysii Maxkamadda Canshuurta isla markiiba (651) 539-3260, ama iimayl ahaan info@taxcourt.state.mn.us. **Waa inaad ogeysiisaa Maxkamadda Cashuurta maalinta ka horaysa intaan wax maxkamad ah la qorshayn ama waxaa lagaa rabaa inaad bixiso khidmadaha war-bixiyaha maxkamadda.**

Ayaa go'aan ka gaaraya kiiskeyga?

Rafcaankaaga waxaa go'aan ka gaari doona mid ka mid ah seddexda garsoore ee Maxkamadda Canshuurta.

Miyaan u baahanahay qareen?

Sharciyada Maxkamada Cashuurtu waxay uga baahan yihiin qaar ka mid ah cashuur bixiyayaasha inay lahaadaan qareen kiisaska lagu dhagaysto Qaybta Caadiga ah. Kiisaska Qaybta Dacwadaha Yaryar, qareennada waa la oggol yahay laakiin looma baahna. Sida kale, uma baahnid qareen, in kastoo aad rabto inaad mid kireysato. Xeerarka Nidaamka Madaniga ah iyo Xeerarka Caddaynta ayaa khuseeya cashuurta racfaan qaadashada sida ay u sameeyaan dacwadaha kale. Adiga kaliya ayaa go'aan ka gaari kara inaad u baahan tahay qareen ku caawiya iyo in kale.

Haddii aan u dhaqmo sidii qareenkayga, waa maxay waajibaadyadaydu?

Nooc kasta oo khilaaf sharciyeed ah dhinac ayaa leh culeys caddayn ah, ama mas'uuliyad weyn ka saaran tahay inuu caddeeyo kiiskiisa. Sharciga Minnesota wuxuu u maleynayaa in Wakiilka Dakhliga uu si sax ah u qiimeeyay cashuurta. Sida racfaan-qaataha - qofka keenaya kiiska - “culayska caddaynta” adigaa iska leh Waa inaad caddeysaa inuu Wakiilka ku khaldamay inuu ku guuleysto racfaankaaga.

Sida qareenka oo kale, waa inaad soo aruurisaa caddayn oo aad baaris ku sameysaa arrimaha sharciga iyo xaqiiqda ah ee ku lug leh kiiskaaga. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad wacdo markhaatiyaasha oo aad su'aalo weydiiso. Waxaad xaq u lahaan doontaa inaad su'aalo weydiiso ama aad is-weydaarsato markhaati kasta oo uu keeno wakiilka Xubinta waaxda. Waxaad sidoo kale noqon kartaa markhaati, adoo ku marag furaya magacaaga kana jawaabaya su'aalaha wakiilka Xubinta waaxda.

Maxaan maxkamada la imaadaa?

Keen dhammaan caddaynta aad rabto inaad soo bandhigto. Hubso in markhaatigaagu, haddii ay jiraan, ay diyaar u yihiin inay ku marag furaan. Maaha inaad keento markhaatiyaal, laakiin way adkaan kartaa inaad caddayso kiiskaaga iyadoon macluumaad laga helin markhaatiyaal. Waad ku markhaati furi kartaa magacaaga.

Sideen kusoo bandhigi karaa bandhig adag?

Halkan waxaa ku yaal qodobbo ay tahay inaad xasuusato markaad qorshaynayso soo bandhigiddaada:

- **Samee diyaarintaada.** Samee liistada qodobbada muhiimka ah ee aad rabto inaad samayso. U hayso tixraac ahaan.
- **Raac aadaabta qolka maxkamada.** Waqtiga ilaali. Si hufan u labiso. Garsooraha ugu wac "Mudane."
- **Dhis goobta.** U sheeg garsooraha isla markiiba arrimaha la isku haysto iyo waxa mowqifkaagu yahay, markaa garsooraha ayaa u fahmi doona doodahaaga si buuxda.
- **Weydii su'aalo gaar ah markhaatiyaasha.** Haddii aad su’aal weydiinayso markhaati aad keentay ama mid uu Wakiilku wacay, weydii su'aalo gaar ah si aad macluumaad u ururiso. Ha la murmin markhaatiyaal.
- **Ka dhig bandhiggaaga mid kooban oo xaqiiqda ku salaysan.** Haddii aad si fiican u diyaar garawday, waa inaad si sax ah u ogaataa caddaynta aad rabto inaad soo bandhigto. Si toos ah oo xaqiiqo ah u samee.
- **Si xushmad leh u dhagayso mucaaradka.** Kadib markaad maxkamadda u sheegto sheekadaada oo aad wacdid markhaatiyaasha, waxay noqonaysaa markiisa Xubinta waaxda inuu sameeyo kiiskiisa. Si xushmad leh u dhagayso. Ha soo dhex galin Qoraal ku samee qodob kasta oo aad jeclaan lahayd inaad sii caddayso markaad fursad u hesho inaad su'aalo weydiiso Markhaatiyaasha Xubinta waaxda.

Ayaa marka hore hadla maalinta maxkamadaynta?

Racfaan qaate ahaan, waxaad marka hore soo bandhigi doontaa caddayntaada. Kadib marka markhaatiyaasha labada dhinacba la dhagaysto, waxaad fursad u heli doontaa inaad ku soo koobto kiiskaaga maxkamadda. Tani waa fursadaada aad ku tusayso garsooraha siday caddayntaadu u taageerayso go’aankaaga. Hadalkaagu ha noqdo mid kooban oo xaqiiqda ku saleysan. Khudbad dheer ma hagaajineyso kiiskaaga haddii xaqiiqooyinka aysan taageerin go’aankaaga.

Maxay yihiin kharashka maxkamadeynta ee aan aniga masuul ka ahay?

Adiga ayaa mas'uul ka ah wixii kharash ah ee la xiriira diyaarinta iyo soo bandhigida kiiskaaga. Haddii dacwadaada laga dhageysto Qaybta Joogtada ah, war-bixiye maxkamadeed waa inuu goobjoog ahaadaa si loo duubo waxa la sheegay. Adiga ayaa masuul ka ah bixinta war-bixiyaha maxkamada. Fadlan diyaarso si aad lacag u siiso war-bixiyaha kahor intaan dhagaysigu bilaabmin.

Muddo intee le'eg ayay maxkamaddu socon doontaa?

Maxkamadeynta ayaa sii socon doonta illaa iyo inta caddaymaha oo dhan la soo bandhigayo. Ma jiro waqti xaddidan.

Ma lay soo celin karaa lacagtii aan ku bixiyey kiiskayga?

Maxkamadda Canshuurta ee Minnesota waxay awood u leedahay inay amarto in lagaa bixiyo kharashyada qaarkood. Si aad uga soo kabato kharashaadka, waa inaad marka hore ku guuleysato racfaankaaga kadibna aad ku dhaarataa liiska kharashaadka aad galabsatay, oo ay la socdaan rasiidhado. *Eeg Nidaamka* Xeerarka Maxkamadda Canshuurta, Xeer 8610.0150.

Goormaan ogaan doonaa haddii aan ku guulaystey kiiskeyga?

Caadi ahaan garsooraha ayaa ku dhammayn doona dhagaysiga asagoo qaadanaya dacwadda la talin. Taasi waxay ka dhigan tahay in dhagaysiga ku dhammaado go'aan la'aan, si garsooruhu u helo waqti uu si taxaddar leh uga fiirsado macluumaadka la soo bandhigay. Labada dhinacba waxay ku heli doonaan go'aanka maxkamadda 3 bilood gudahood ee soo gudbinta kama dambaysta ah. Go’aanno badan oo ah Qaybta Caadiga ah ee Maxkamadda Canshuurta ee la soo saaray tan iyo 1992 ayaa laga heli karaa Websaydka Maxkamadda Canshuurta.

Racfaan ma ka qaadan karaa kiiskeyga?

Dacwadaha laga dhagaystay Qaybta Dacwadaha Yaryar ee Maxkamadda Cashuuraha ee Minnesota racfaan lagama qaadan karo. Go’aanka garsooruhu waa kama dambays. Haddii kiiskaaga laga dhagaystay Qaybta Caadiga ah, waxaad uga dacwoon kartaa Maxkamadda Sare ee Minnesota. Haddii aad rabto inaad raacdo doorashadan, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad la tashato qareen gargaar; waxaa jira waqtiyo xadidan oo ku saabsan xuquuqdaada racfaan.

Haddii aan guuleysto, goorma ayaan helayaa lacagtayda?

Lacag celinta waxaa samaysa Waaxda Canshuurta; Xubinta Waaxda Dakhliga ayaa kuu soo diri doona jeeg. Taa beddelkeeda, haddii lacag lagugu leeyahay, adiga ayay kugu xidhan tahay inaad lacag bixinta la dejiso Waaxda Dakhliga.

Ilaha Macluumaadka ee Dheeraadka ah

Xeerarka Minnesota cutubyada 271 iyo 278; Xeerarka Nidaamka Madaniga ah ee Minnesota; Xeerarka Caddaynta ee Minnesota; Xeerarka Nidaamka Maxkamadda Canshuurta ee Minnesota; waxyaabaha tixraaca waxaa laga heli karaa maktabadaha dadweynaha; ama la tasho qareen. Xiriirinta waxyaabahan iyo dukumiintiga, "Soo-bandhigida Racfaanada Amarrada Xubinta Waaxda Dakhliga ee Maxkamadda Canshuurta ee Minnesota," waxay ku jiraan websaydka Maxkamadda Cashuurta. s